Fasaxa kuleylaha ee degmada Lindesberg 2018

Maxaad samayneysaa wakhtiga kuleylaha? Miyaadan haysan wax qorshe ah oo gaar ah? Ma u raaceysaa saaxiibadaadii hore iyo kuwo cusuba xerooyin wakhtiga xagaaga ee degmadu diyaarisay.Ama ma dooneysaa inaad baratid dabaal adigoo dhiganaaya mid ka mid ah iskuuladyada laga barto dabaasha.

Waxaa jira 14 xero oo wakhtiga xagaaga la tago 4 iskuul oo dabaasha laga barto oo aad kala dooran kartid. Xerada waxaa la joogaa 3–5 maalmood , waxaana jira kuwo maalintiiba laga soo laabanaayo iyo kuwo habeenkii la seexanaayo. Iskuulada dabaasha waxaa ay socdaan 14 ama 15 maalmood , waxaana la doonayaa ka qaybqaadasho buuxda.

Yaa loogu loogu talo galay: Xerada waxaa loogu talo galay caruurta iyo dhalinyarada kuwaasoo dhashay 2003-2011 , iskuulada dabaashana waxaa loogu talo galay caruurta dhalatay 2003-2012. Dhamaan wax walba waa u furan yihiin dhamaan caruurta oo dhan kuwaasoo ka diiwaan gashan degmada Lindesberg. Ma hubi karno in dhamaan caruurta uu lixaadkoodu dhiman yahay ay ka wada qaybqaadan karaan xerooyinka xagaaga oo dhan. Balse la xiriira qofka xiriiriyaha ah ee jooga xero xagaa walba si aad u heshaan warbxin dheeraad ah. Xerada13 waxaa loogu talo galay caruurta lixaadkoodu dhiman yahay

Is diiwaan gelin: diiwaan gelinta waxaa lagu soo gudbinayaa dhinaca internetka iyo hoyga degmada www.lindesberg.se/sommarlov.
Haddii aad u baahan tahay caawinaad kolka aad diiwaan gelinta samayneysid, kolkaas la xiriir mid ka mid ah xiriiriyayaasha hoos ku xusan.

Waxaad isu diiwaan gelin kartaa laba xero xagaayeed iyo hal iskuul oo dabaasha ah.Ogow isdiiwaangelintu waa waajib mana aad bedeli kartid diiwaan gelintaada wakhti dame. Ilmihiiba hal diwaangelin ayaa loo ogolyahay. Waxaa jira boosas aan badnayan oo dadku wadaagaan, waxayna u dhexeeyaan 15-60 xeradii xagaa ama iskuulba.

Isdiiwaangelintu kuma siineyso boos toos ah oo aad ku tashato. Markii isdiiwaan gelintu dhamaato ayaa waxaa lagugu casumayaa boos, ka dibna waa inaad ogolaataa. Waa inaad si deg deg ah usoo jawaabtaaa oo aad muujisaa inaad ka qayb qaadanaysid, laakiin ugu yaraan laba usbuuc inta aan howshu bilaaban waa inaad soo jawaabtaa.

Maalinta ugu damaysa diiwaangelinta : 2018-05-31

Kharashka : Dhamaan ka qaybgalku waa lacag la aan.

Cuntada iyo faakihaysiga : Xerooyinka xagaaga waa laga helaa , laakiin iskuulka dabaashu ma laha wax cuno ah

Gaadiidka : Waa la idinla socodsiinayaa haddii gaadiidka la raacaayo la iska kaashanaayo.

Si dad badan oo degmada ahi uga qaybgalaan ,waxaan ku dadaalaynaa in gaadiidka dadka qaadaaya la iska kaashado oo la isku xirmo si loo wada qorsheeto.

Ka qaybgalayaasha da`doodu u dhexayso 13-15 sano Waxaa ay qaadan doonaan gaadiidka degmada ee caadiga ah haddii aan si kale loo habayn gaadiid

Waxiii suàalo ah ee ku saabsan arrimaha xerooyinka xagaaga La xiriir dadka jooga ee xiriirka u qaabilsan xerooyinkaas. Ogow xiriiriyayaashu ma qabtaan wax codsi ah.

Suàalaha guud ee ku saabsan codsiga isdiiwaan gelinta. Waxaad la xiriirtaa
Alice Lindstedt 079-060 45 83
Jonas Andersson 0581-811 66
Sara Sporre 0581-811 45
Björn Persson 070-654 37 37

Ama u dir boosto : lov@lindesberg.se (Is diiwaangelinta xerooyinka waxaa laga sameeyaa oo keliya hoyga internetka)

Xerada 1, usbuuca 25 18-20 bisha juun
Waa mid la yiraa (Teknikkul med Komtek)
Xeradaan waxaa ay ku haboon tahay qofka jecel inuu wax dhiso , wax tijaabiyo ama xal dhinaca farsamada ah helo. Waxaa caawinaad iyo gacan qabasho aad ka heleysaa caawinayaal aad u wanaagsan. Waxaa kaloo aad heleysaa qalabkii aad ku shaqeyn lahayd sida mashiinada oo kale. Waxaa dhiseysaan meelaha wax lagu xanibo oo goo,go an iyo meelaha ay ku degaan diyaaradaha macamalka ah ee la adeegsado.
Da`da : 7-9 jir
Meesha : Meel u muuqata garoonka Lindesberg (Utsikten i Lindesberg Arena)
Wakhtiga : 10:00-14:00
Qabanqaabiye : degmada Lindesberg
Gaadiidka : Waxaa maarayn kara degmada Lindesberg iyo degmooyinka u dhow
Xiriiriye : Sara Sporre 0581–811 45
Inta boos ala hayo : 20

Xero 2, usbuuc .25 18-21 bisha juun
Maalmaha farsamada (Teknikdagar i Lindesberg)
Afar ayaamood oo buuxa oo wiilal iyo habloba leh. Waxaa la baranayaa waxyaalo badan oo ku saabsan dhanaca farsamada. Usbuucii waxaa la tijaabinayaa sida loo qaado sawirada, sida loo sameeyo hoyga internetka iyo sida wax loo alxamo.
Da,da : 13-15 jir
Meesha : waa iskuulka (Lindeskolan och Masugnen i Lindesberg)
Wakhtiga : Isniin -arbaca , saacad . 08:30-15.30, khamiis 08:00-12:30
Gaadiid : wax gaadiid ah ma jiro
Qabanqaabiye : degmada Lindesberg
Xiriiriye : Kristian Måsén 076–551 52 24
Boosaska: 30

Xerada 3 , usbuuca .26 25–29 bisha juun
Xero wax la tijaabiyo (Äventyrsläger i Kloten)
Waa xero la soo seeexdo habeenkii ee ku taala meesha la yiraa Kloten taasoo la tijaabinaayo waxyaalo la qabto oo kala duwan, adigoo kala qayb gelaaya saaxiibadii hore iyo kuwa cusuba. Tijaabi legdinta jabaanka, doon la wado, ama meelaha dhaadheer ee laga soo boodo?
Da`da 10–12 jir
Meesha : waa (Lägerskolan i Kloten)
Gaadiid: Bas ayaa aadaaya kana imaanaya meesha la yiraa Fellingsbro, Ullersäter, Frövi, Bertilsbro, Vedevåg, Lindesberg, Fanthyttan, Guldsmedshyttan, Storå, Löa.
Qabanqaabiye: degmada Lindesberg
Deegaan: 2–8 qof qolkiiba .Soo qaado goàaga
Qofka xiriirka : Björn Persson 070-654 37 37
Inta boos: 48

Xerada 4, usbuuca .26 25–29 juun
Waa xerada dhinaca warbaahinta (Media Camp) – Usbuuc wax qabad !
Ma dooneysaa inaad tijaabiso filim, ama sida loo diyaariyo filmada , ama sawirada , ama muusiko iyo dhinaca codka adigoo isticmaalaaya qalab casri ah? Waxaa hogaamin doona howhaas macalimiin aad u taqaan howsha
Da`da : 13–15 jir
Meesha : waa (Kulturrum, Lindeskolan i Lindesberg)
Wakhtiga : 09:00-15:00, Waxyaalaha la sameeyey waxaa la soo bandhigayaa 13:00-15:00
Gaadiidka : Ma jiro
Qabanqaabiye : Degmada Lindesberg
Xiriiriye Klas Friman 073–356 38 84 iyo Johan Wennman 070–510 40 04
Boosaska : 20

Xerada 5, usbuuca .27 2-6 bisha luuliyo
Waa usbuuca dhinaca isboortiga ee degmada Lindesberg
Usbuucaas dhexdiisa waxaad tijaabineysaa isboortis kala duwan kuwaasoo ka dhacaaya agagaarka garoonka weyn ee Lindesberg. Waxaa uu noqon doonaa waxyaalo kala duwan oo aad u xiiso badan, oo ay ku jiraan waxyaalo musaaraco ah iwm. kaasoo lagu soo afjari doono qaab xiiso badan . Waxaa uu noqon mid xiiso badan!
Da`da : 7-9 år
Meesha : waa meelaha u dhow garoonka Lindesberg(I och omkring Lindesberg Arena)
Wakhtiga : 09.00-15.00
Gaadiid: Ma jiro
Qabanqaabiye : waa ururka (Lindesbergs VBK)
Xiriiriye: Alma Viggeborn 070-640 43 16
Booasas: 30

Xerada 6, usbuuc .27 2-6 luuliyo
Xerada ciyaaraha , qoobka ciyaarka (Dance Camp)- waa qofka jecel ciyaaraha qoob ka ciyaarka . Waa ciyaaro loo sameynaayo si deg deg ah oo xiiso badan.Waxaana hogaaminaaya macalimiin. Usbuuca dhexdiisa waxaa la tijaabinayaa ciyaaro kala duwan
Sida hip hop ka ciyaarah jaazka iyo kuwo kale. Markii lasoo bandhigaayo waxaad casumi kartaa saaxiibo iyo qaraabo
Da`da : 13-15 år
Meesha : waa garanoonka (Lindesberg Arena)
Wakhtiga : 09:30-16:00. Soo bandhig kl.17.00

Gaadiid : ma jiro
Qabanqaabiye: Degmada Lindesberg
Xiriir: Madeleine Carlsson 076-725 77 41
Inta boos: 20

Xerada 7, usbuuca .27 3–5 luuliyo
Maalmaha muusikada ee Lindesberg – waa qofka jecel inuu noqdo fanaan
Ma jeceshahay inaad noqoto Fanaan ama DJ?
Mudo sadex beri gudahood ah waxaa aad tijaabineysaa qalab muusiko oo kala duwan.Meel masrax ah ee lagu soo bandhigo iyo meel diyaarin ah ayaad heleysaa.Waxaana aad ka qayb noqon doontaa fanaaniinta soo bandhigi doona taratan faneedka Lindesberg
Da`da : 10–12 år
Meesha : Waa goobta la yiraa Hillstreet ee Lindesberg (Kullgatan 1)
Wakhtiga : 10:00–15:00
Gaadiidka : Degmada Lindesberg iyo degmooyinka kale ayaa isla kaashanaaya
Qabanqaabiye : waa urur tacliimeedka Studiefrämjandet
Xiriiriye waa Christer Pilblad 070–408 62 44
Boos: 15

Xerada 8, usbuuc .28 9–13 luuliyo
Usbuuca Firfirconida ee Lindesberg
Usbuucaan waxaa la samaynayaa waxyaalo badan oo xiiso leh , haddii ay hawadu masaabaxdo, waxaan isu deyeynaa in aan ku ciyaaro banaanka. Waxaa dhacaaya tartamo xarig jiid , golofka iyo noocyo kubadeed kala duwan. Waxaan ku soo xiri doonaa feesto , jalaato badan la cunaayo usbuuca 37:aad !
Da`da : 10–12 år
Meesha : Waxaa laga baxayaa (Utgår från Lindesberg Arena)
Wakhtiga : 09.00-15.00
Gaadiidka : Ma jiro
Qabaqaabiye : waa ururka (Lindesbergs VBK)
Xiriiriye : Alma Viggeborn 070-640 43 16
Boosas: 25

Xero 9, usbuuc .29 16-20 luuliyo
Qoob ka ciyaar qof bilow ah
Ma xiiseysaa ciyaaraha qoob ka ciyaarka ? Kolkaas xeradaan ayaa ku anfacaysa . Tijaabi ciyaaro kala duwan iyo bandhig Jaaz. Waa inaad barataa sida loo ciyaaro oo kala duwan. Dad badan ayaad la kulmeysaa , wiilal iyo habloba. Ciyaaraha waxaa ay dhaliyaan farxad
Da`da : 10-12 sano
Meesha : Waa garoonka Waa garoonka Lindesber (Lokal: aktiviteten)
Wakhtiga : 10.00–16.00
Gaadiidka : Degmada Lindesberg iyo degmooyinka kale ayaa iska kaashanaaya
Qabanqaabiye : Stråssa GF Lindesberg
Xiriiriye : Anna Engström 070–686 35 99
Boosas : 20

Xerada 10, ubuuca .30 23-27 luuliyo
Waxaa xiiso leh xayawaanka
Xeradaan waxaa ay ku haboon tahay qofkii jecel xayawaanka, ama doonaaya inuu barto saaxiibo cusub.

Waxaan samayneynaa waxyaalo badan oo xiiso leh, tusaale ahaan mooto afar lugood ah ayaan la wadayaa, baabuur la riixo iyo waxyaalo kale oo xiiso leh. Waxa la baranayaa xayawaanaad baan oo xiiso leh oo jooga xerada. Noo raac daawashada xayawaanka xiisaha leh
Da`da : 7-9 jir
Meesha : Waa Reidarsgården ee ku taal banaanka Lindesberg xaafadeheeda (f.d. Klockarsgården)
Wakhtiga : 09:00-14:00
Gaadiid: Laga baxayaa goobta safarada ee Lindesberg. Degmada Lindesberg iyo degmooyinka kale ayaa iska kaashanaaya
Qabanqaabiye : Waa ururka fardaha xanaaneeya ee (Reidarsgården hästsport (f.d. Klockarsgården)
Xiriiriye : Johanna Reidarsdotter 070-360 97 85
Booska : 25

Xerada 11, usbuuca .31 30 luuliyo -3 agoosto
Farda raacis bilow ah
Mudo usbuuc ah ayaad baran doontaa sida loo raaco fardaha iyo sid loo xanaaneeyo. Xeradaan waxaa loogu talo galay qofka aan horay usoo raacin fardo oo ku cusub. Waxaan jeclaan lahayn iney wiilal xitaa ku jiraan.
Da`da : 7-12 jir
Meesha : Meeshu waa (Norslunds ridanläggning, Lindesberg)
Wakhtiga : 09.00-15.00
Gaadiidka : Degmada Lindesberg iyo degmooyinka kale ayaa iska kaashanaaya.
Qabaqaabiye : waa ururka fardaha (Föreningen Linde Ridskola)
Xiriiriye : Petra Holm 070-359 38 86
Booska : 15

Xerada 12, Usbuuca .32 6-9 agoosto
Iskuulka taratanka fardaha
Xerada tartanka fardaha waxaa ay ku haboon tahay qofka xiiso badan u qaba tartanka fardaha ee xiisaha leh. Muddo afar beri ah ayaad wax badan ka baraneysaa fardaha , iyo ku tartanka fardaha ee garoonka farduhu ku tartamaan.Khibrad hore ee ku tartamida fardaha looma baahna. Iskaashi ka dhexeeya iskuulka tartanka fardaha Örebro/Linde waxaa laga yaabaa inaad noqoto faras ku tartame xidig ah!
Da`da : 7-12 jir
Meesha : waa garoonka fardaha (Fornaboda travbana)
Wakhtiga : 09.00-15.00
Gaadiidka : Waxa laga baxayaa goobta safarada ee Lindesberg. Degmada Lindesberg iyo degmooyinka kale ayaa iska kaashanaaya
Qabanqaabiye :Iskuulka fardaha(Örebro/Linde Travskola)
Xiriiriye : Lena Thybeck 070-555 82 02
Boosaska: 16

Xerada 13, usbuuca .32 8-10 agoosto
Xero dhinaca isboortiga ee loogu talo galay dad gaar ah
Xeradaan waxaa loogu talo galay dadka ama ardayda dhigata dugsiyada gaar ka ah. Waa dugsiyada ay dhigtaan qofkii lixaadkiisa wax u dhiman yihiin.Maalintiiba waxaan tijaabin doonaa laba ciyaarood : Banooniga gacanta , juudooga , xeego iyo kuwo kale.

Xerada waxaan kusoo dhamaystiri doonaa maalin qiimo leh oo ka dhacaysa garoonka tartanka fardaha ee (Fornabodas travbana) . Xerada waxaa jooga tababarayaal dheeraad ah si loo helo fursado badan.
Da`da : 9-15 jir
Meesha : Garoonka Lindesberg iyo Garoonka ciyaaraha fardaha (Fornaboda Travbana)
Wakhti 10.00-14.00
Gaadiid : Degmada Lindesberg iyo degmooyinka kale ayaa iska kaashanaaya
Qabanqaabiye : degmada Lindesberg
Xiriiriye : Björn Nyberg 076-141 29 99
Boosas: 25

Xerada 14, Usbuuca.33 13-17 agoosto
Xerada walxa tijaabinta (Äventyrsläger i Kloten)
Xero fasax wakhtiga qoraxda ee la yaqaan.Meesha la yiraa Kloten waa meel habeenkii la seexan karo, waxaana ay ku haboon tahay, qofkii doonaaya inuu tijaabiyo waxa uu awoodo, ama xadkiisa.
Inta usbuuca lagu dhex jiro waxaan haysanaa waxyaalo la qabanaayo oo kala duwan, laga bilaabo subaxii ilaa fiidkii, tusaale ahaan doon yar oo biyaha lagu wadaayo, meel dheer oo laga boodaayo, iyo legdinta jabaanku ciyaaraan (sumobrottning). Waxaa lagu siinayaa wakhti firaaqo ah ee aad saaxiibadaada cusub iyo kuwii horeba aad kula kulanto.Waa badaalan doontaa, kaluumaysi baa jira iyo waxyaalo kale oo badan.
Da`da: 13-15 jir
Meesha : Iskuulka la yiraa (Lägerskolan i Kloten)
Gaadiid: Bas baa tegaaya kana imaanaaya Kloten , Fellingsbro, Ullersäter, Frövi, Bertilsbro, Vedevåg, Lindesberg, Fanthyttan, Guldsmedshyttan, Storå, Löa.
Qabanqaabiye : Degmada Lindesberg
Deganaan: 2-8 qof qolkiiba. Go`soo qaado
Xiriiriye: Björn Persson 070-654 37 37
Inta Boos: 48

Usbuuca 26-32 25 juun– 12 agoosto
Samee waxyaalaha aad jeceshahay ee ku haboon wakhtiga xagaaga – Goobta (Fritidsbanken Lindesberg)
Goobta lagu magacaabo (Fritidsbanken) ee ku taal Lindesberg waxaa ay u guurayaan inta xagaaga ah garoonka weyn ee degmada Lindesberg.Halkaas ayaa si sahal ah uga deysan kartaa qalabka aad u baahan tahay si aad u ciyaarto adiga iyo saaxiibadaaba ama qoyskaaga.

Waxaad deysan ama amaahan kartaa laash ama doon yar, qalabka lagu kaluumaysto,kubado kala duwan sida kubada fooliga, kubada cagta, kabaha shaagaga leh iyo waxyaalo kale oo la isticmaalo kolkii banaanka lagu ciyaaraayo.

Meesha : Garoonka weyn (Lindesbergs Arena)
Wakhtiga: Maalin walba 10.00-18.00
Xiriir: meesha la yiraa ;Fritidsbanken 0581-817 64

Iskuulada dabaasha oo lacag laàan ah

Caruurta iyo dhalinyarada da`doodu tahay 6–15 jir (dhashay 2003-2012) ee aan dabaasha aqoon oo xitaa laga yaabo iney biyaha ka baqaan.

Iskuulka dabaashu waxaa uu socdaa 14 ama 15 maalmood oo isku xiga kaasoo ah 40 daqiiqo oo cashar ah. Casharadu waa gelinka hore oo keliya. Waan ka xunahay maadaama aadan wakhti dooran karin maadaama ,kooxa loo qaybiyo hadba aqoontooda dabaashu inta ay leèg tahay. Waxaa muhiim ah qofka la diiwaan geliyey inuu ka qaybqaato dhamaan wakhtiga waxbarashada.Haddii aad isu diiwaangelisey xero xagaa kale,oo wakhtigu kolkas isku soo aado, waxaa muhiimada la siin doonaa iskuulka dabaasha.

Wax cunto ah ama faakihaysi ah lama socdaan tacliinta.Adiga ayaa masuul ka ah inaad iskuulka dabaasha tagtid, kana soo laabatid. Ma hayno wax fursad ah oo aan gaadiid ku qaada ku diyaarino.

Iskuulka dabaasha ee Lindesberg
Waxaa lgu sameynayaa meesha dabasha ee la yiraa (Energikällans bad)
Iskuulka dabaasha 1: Usbuuca.25-27: 18 juun-6 luuliyo
Iskuulka dabaasha 2: Usbuuca .31-33: 30 luuliyo-17 agoosto
Da`da: 6-15 jir
Wakhtiga: Gelinka hore maalin walba oo aan usbuuc fasaxa ahayn ee caadiga ah
Qabanqaabiye: Waa meesha la yiraa (Besök Linde AB)
Xiriiriye: Åsa Jönsson-Carlsson 0581-815 72
Inta Booas: 45 per simskola

Iskuulka dabaasha ee Fellingsbro
Waxaa lagu samaynayaa meesha lagu dabaasho ee banaanka ku aal ee Fellingsbro.
Iskuulka dabaasha 3: usbuuca .25-27: 18 juun-6 luuliyo
Iskuulka dabaasha 4: Usbuuca .31-33: 30 Luuliyo -17 agoosto
Da`da : 6-15 jir
Wakhtiga :Gelinka hore maalin walba oo aan usbuuc fasaxa ahayn ee caadiga ah
Qabanqaabiye: ururka Fellingsbro GOIF
Xiriiriye: Mia Järpenberg 070-450 85 56
Inta Booas: 60 iskuulkiiba